

U dhis aasaas fiican xiriirka ilmahaaga

ABC Föräldraträffar

0-2 sanno

Nolosha carruurto waa farxad miiran, balse wadata culayskeeda. Ku soo dhowow **ABC kulammada waalidiinta 0-2 sanno** halkaasoo aad ka helaysid qalab iyo talooyin la taaban karo oo fududaynaya nololmaalmeedka, xoojinayana waxbarashda iyo horumarka ilmahaaga. Kulammada waxaan isku arkaynaa si koox ah si aad ula sheekaysatid waalidiin kale, isweydaarsataan khibrado oo aad heshid aragtiyo cusub.



ABC föräldraträffar
goteborg.se/abc



Göteborgs
Stad

Salaan waalid!

Ma sax ayaan sameeyaa? Maxay ilmahayga u baahan yihiin? Sideen sameeyaa saan u fahmo? Waa su'aalo badan oo ay qabaan waalidiinta ilmaha yaryar. ABC kulammada waalidiinta 0-2 sanno waxay ku siinayaan talo ilmaha loogu abuurto waqtiyo wadajir ah oo wanaagsan.

Kulammadu waxay ku saabsan yihiin nolosha qoyska iyo sida aad u taageeri karto horumarka ilmahaaga ka waalid ahaan una maarayn karto culaysyada. Waxaan kulmaynaa afar jeer, kana shaqaynaynaa mowduucyadan:

- » Dad waaweyn oo muhiim ah
- » La wada jiro
- » Xaalado culays leh
- » Waalidnimo deggan

"Lamaankayga iyo aniga in badan ayaan isku amaannaa waalidnimada, waxna uga doodi karnaa si kale"

Sidan ayay yiraahdeen waalidiin soo dhigtay ABC



Iskaan ka qaad koodka QR si aad uga heshid kulan waalid meel kuu dhow. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan taageerada waalidiinta waxaad ka helaysaa: goteborg.se/foraldrastod

"Waxaan doorkayga waalidnimo ku dareemaa degganaan iyo hubaanti hadda markaan helay habab la taaban karo oo aan ku shaqeeyo"

Carruurto idil oo bartamaha ah (ABC) waa barnaamij taageero waalid hadafkiisuna yahay in la xoojiyo xiriirka ka dhexeeya ilmaha iyo waalidiinta oo kulamo kooxeedyo xoogga lagu saarayo islafalgalka, xiriirirka iyo rootiinnada maalinlaha ah la qabto. Waa Kulammo bilaash ah loogu talagalay waalidiinta heysta carruurto jira 0-2 sanno, 3-12 sanno iyo da'da qaangaarka.